# ISWIIDHAN LOO WADA JIRO

**Waxaan aaminsanahay wada shaqeyn.** Waayo-aragnimada laga helay aafadi iyo sidoo kale dagaalka Ukrayn waa in ay Iswidhan xooggantahay marka aan wadajir ula kulanno dhibaatooyin, ka waddan ahaan. Intii ay aafadu socotay, waxay aadanuhu la qabsadeen in ay ilaaliyaan caafimaadka dadka kale. Sannadkan, tiradii ugu badneyd ee Iswiidhish ah ayaa dalbatay in ay ku biiraan ciidamada difaaca qaranka, waxayna caddeeyeen inay diyaar u yihiin inay difaacaan waddankeenna. Haddana waxaan sare u qaadaynaa difaaca Iswiidhan oo dhan walba leh.


**Waxaan rabaa inaan xoojiyo Sweden.** Innagoo leh midnimo la mid ah tii xilliyadii aafada, waxaynu wax ka qaban doonnaa dhibaatooyinka bulsho ee dalkeenna wiiqaya. Dambiyada halista a h iyo kala sociddu waxay waxyeello u geysanayaan midnimada bulshadeenna. Ku-tiirsanaantayada shidaalka la qodo waxay khatar ku tahay cimilada iyo amnigeenna labadaba. Lacagta canshuuraha ee lagu bixin lahaa dugsiyada Iswiidhishka iyo daryeelka waayeelkana waxaa faa'iido ahaan u qaata maal-qabeennada khatarta u bareera.

Sidan uma baahna in ay wax ahaadaan. Waxaan rabnaa inaan bedelno taas.

**Waxaan rabnaa:**

- In aan rogno dhagax kasta si aan u jebinno dembiyada, una joojinno is kala sooca.
- In aan Iswiidhan ka abuurno shaqooyin cusub annagoo horay u riixeyna la qabsashada isbedelka cimilada.
- In aan soo ceshanno kontoroolka dimoqraadiga ee barwaaqa sooranka.

Waan sameyn doonaa wixii loo baahanyahay si aan u xoojiyo waddankeenna.
Maxaa yeelay **Iswiidhanteennu waa ay ka fiicnaan kartaa.**



Magdalena Andersson

Lättläst svenska, Soomaali, عربي, English, Español, Suomen kieli, Meänkieli, دری, Davvisámegiella, Deutsch, Srpski, Hrvatski, Bosanski, فارسی

Maanta xubin noqo! Fur app-ka Swishka ee skaan-garee koodka QR-ka

Socialdemokraterna



# LA DAGAAL DEMBIYADA, JEBINA IS KALA SOOCA

Dagaalka bulshada ee ka dhanka ah dambiyada waa in uu ahaadaa mid aan naxariis lahayn.Dhammaan meelaha la degganyahay waa inay amaan ahaadaan, waana in xaaladaha nololeed ee meelaha nugul la wanaajiyaa. Qof kasta oo shaqeyn kara waa inuu shaqeeyaa.

**Waxaan rabnaa:**

**Ciqaabo badan in la adkeeyo iyo in si ballaaran loo dhiso garsoorka.** Booliska, ciidamada asluubta, xeer-ilaaliyeyaasha iyo maxkamaduhu waa inay lahaadaan shaqaalaha iyo aaladaha ay u baahan yihiin si ay ula dagaallamaan dambiyada. Ciqaabta dambiyada la xiriira baandooyinka waa la adkeyn doonaa.

**In la joojiyo qorashada gaangiistarrada ee xubnaha cusub.** Bulshadu waa inay si dhakhsi ah oo wax ku ool ah u fara gelisaa marka ay dhallinyaradu khatar ugu jirto in dembiyo loo qorto. Dhammaan dhalinyaradu waa inay aadaan dugsiyo wan-wanaagsan, ayna arkaan waalidkood oo shaqo tagaya. Iswiidhan waxay xoogeysaneysaa marka uu qof walba ka qeyb qaato oo uu gacan geysto waxay bulshadu wadaagto.

**Jebi is kala soocidda.** Qof walba waa inuu buuxiyaa shuruudo cad oo isku mid ah, fursadna u helo in uu isku masruufyo shaqadiisa. Fursado waxbarasho oo wanwanaagsan, wakhti firaaqo oo macno leh, shaqada ugu horreysa iyo guri ayaa noqon doona kuwo badan iyadoon taas loo eegeyn meesha ay dhallinyaradu ku koraan.



# SOO CESHO KOONTAROOLKA DIMUQURAADIGA EE BARWAAQA SOORANKA

Waa in nidaam iyo kala dambeyn ay ka jiraan iskoollada, daryeelka caafimaadka iyo daryeelka dadka da'da ah. Shaqaaluhu waa in ay ku shaqeeyaan duruufo wanaagsan, dadka iswiidhishuna waa inay xakameyn karaan barwaaqa sooranka ay qebta ka yihiin oo ay ku bixiyaan lacagtooda cashuurta.

**Waxaan rabnaa:**

**In aan joojinno bililiqada barwaaqa sooranka.** Lacagaha canshuurta ee dadka Iswiidhishka waa in loo isticmaalo barwaaqa sooranka, ee aan loo qaadan faa'iido ahaan. Barwaaqa sooranka waa in lagu maamulaa baahida dadka ee maaha in suuqa lagu maamulo. Iskoollada Iswiidhiskku waa in ay mudnaanta siiyaan aqoonta carruurta, ee maaha in ay mudnaanta siiyaan faa'iidada mulkiilayaasha.

**Hagaajinta shuruudaha shaqaalaha barwaaqa sooranka.** Qof kasta oo ka shaqeysa iskool, daryeelka iyo xannaannada waa inay ku shaqeeyaan duruufo wanwanaagsan, mushaar wanaagsan iyo hawlgab lagu noolaan karo.

**Kor u qaad tayada barwaaqa sooranka.** Iskoolka, daryeelka iyo xannaannadu waa in ay helaan shaqaale badan, si ay ardaydu wax badan u bartaan, safafka laamaha caafimaadkuna uu u yaraado, amniga waayeelkuna uu u kordho.

# DEG DEG LA QABSASHADA ISBEDDELKA CIMILADA EE SHAQOOYIN BADAN

Dadka Iswiidhishku waa in aanay ku tiirsanaan dawlado xunxun si ay baabuur u wadaan ama u kululeeyaan guryahooda. Marka aan dib u habeyn ku sameyno warshadeheenna iyo wax soo saarka tamarta, waxaan kordhineynaa amniga Iswiidhan, waxaan dalka oo dhan ka abuureynaa shaqooyin cusub waxaanna yareynaa qiiqa cimilada.

**Waxaan rabnaa:**

**In aan maal gashanno tignoolajiyada cagaaran, aanna jebinno ku tiirsanaanta saliida.** Maalgashiga cimiladu wuxuu kordhinayaa xorriyadda waddankeenna, shaqo ayuu ka abuurayaa dalka oo dhan wuxuuna yareynayaa qiiqa wasakheysan ee hawada ku baxa.

**In aan taageerno warshadaha Iswiidishka.** Warshadaha Iswidhishku waa inay sii wadaan inay sii ahaadaan kuwa dib isu qaabaynta ugu wanaagsan adduunka, abuuraan badeecado iyo adeegyo cusub sidaas darteedna shaqooyin cusub.

**Xaqiijinta duruufo wanwanaagsan.** Shaqooyinka cagaaran ee mustaqbalku waa inay lahaadaan duruufo wan-wanaagsan, mushaar Iswiidhish ah iyo heshiisyo wadajir ah. Fursadaha dib isu qaabeyntu waa inay wanaagsanaan, qof walbana waa inuu helaa badbaado dhaqaale haddii ay yimaadaan xanuun ama shaqo la'aan. Qofki shaqeeyay nolol xirfadeedkiisa oo dhan waa inuu ku noolaan karaa hawlgabkiisa. Waa arin ku saabsan ixtiraam.